Caawi oo wac xarunta xakamaynta xadgudubka

Xarunta xakamaynta xadgudubka waxay taageertaa dhibanayaasha lagu xadgudbay.
Marka booliisku ka mamnuuco qof inuu galo guro ama falaat, waxay markiiba u sheegayaan xarunta xakamaynta xadgudubka. La taliye ayaa kula soo xidhiidhi oo taageero kuu fidin. Toosna waad ula xidhiidhi kartaa xarunta xakamaynta xadgudubka:

Gewaltschutzzentrum Tirol – Innsbruck

Adareeska:
Maria-Theresien-Straße 42a, 6020 Innsbruck
Telefoon: +43 512 571313
Iimayl: office@gewaltschutzzentrum-tirol.at
Barta Internaytka: www.gewaltschutzzentrum.at

Ogolaanshaha shaqo ee haweenay socoto ah. Gudaha xaaladda xadgudubka

Haweenay socoto ah waa dumar ka yimid waddan kale doonayana inay ku noolaadaan gudaha austariya Dumarkani waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogolaansho shaqo xaaladaha xadgudubyada Tani waxay khuseysaa marka ninka naagta la nool ee aan meher ku qabin uu yahay mid aan macquul ahayn sababtoo ah six un ayuu ula dhaqmay ama wuu u gacan qaaday iyada ama ilmaheeda yar.

Tani waxay khuseysaa xaaladda haweenaydaas, waayo dabeecadda ninkeeda ayaa xad gudub ku ah iyada:

- Ay u soo gudbisay arrinta booliiska
  ama
- Ama irbadda ku meel gaarka ah ee maxkamadda ayaa la fuliyay
  ama
- Guurkii ayaa xal loo helay
  ama
- Tusaale ahaan, mid kamid ah dadka ama wakaaladdaha hoos ku qoran ayaa xaqiijin in xadgudubkaasu dhacay:
  - Dhakhtar
  - Cusbitaal, xarun caafimaad
  - Qaxootiga dumarka
  - Xafiiska daryeelka dhalinyarada
  - Xarunta xakamaynta ilmaha

Caawi dhibannayaasha lagu xad gudbay

www.gewaltfrei-tirol.at

Qof kasta wuxuu noqon karaa dhibane lagu xad gudbay, xaataa adiga. Falal badan oo xad gudubyo ah ayaa loogu gaystaa dadka guryahooda, iyo haddii ay yihiin taajiriin ama sabool uma lahan kala duwanaansho.

Xad gudubku dhammaanteen wuu ina khuseeyaa Sharciga ayaa ka xakameeya qof kasta xad gudubka.

Sharciga dawlad goboleedyada: xad gudubku nooc kasta ha ahaadee waa sharci darro!

Noocyada xad gudubyada waxaa ku kira, tusaale ahaan:

- Dhaawac jidheed (jidhka qofka oo la dhaawaco ama waxyeelo la gaadhsiiyo)
- Ceebayn
- kufsi – Taas macnaheedu waa iyadoo qof kugu qasbay galmo wadaag adigoon raalli ka ahayn (doonaynin).
- iyadoo gabi ahaantaadaba qof kale ku kaantaroolay
- La bakhsay iyo nacasnimo xaadhida – Taas oo macnaheedu yahay in lagugu aflagaadooday iyo in qof kale ku quudhsanayo ama qof kale six un kuula dhaqmay iyadoo uuna gacanta ku saarin.
- loo dhaartay

Waan ku caawin karnaa!

Mar walba wuxuun baa la sameeyaa si loo daaweeyo xadgudubka Haddii aad tahay dhibane xad gudub, waxaad xaq u leedahay xakamayn, badbaadin iyo caawimaad. Waa muhiim inaad raadsato caawimaad xaataa haddii ay kugu adag tahay inaad ka hadasho wixii dhacay.

Caawimaadayadu iyo talo bixintayadu waa mid lagu kalsoon yahay bilaashna ah.
Haddii aad rabto, waxaan kuu caawin karnaa si sir ah 9qarsoodi ah) Sir ah (qarsoodi ah) macnaheedu waa nooma sheegaysid magacaaga.

Faah faahin ku saabsan caawimaadda iyo talo bixinta waxaad ka helaysaa:
www.gewaltfrei-tirol.at

Sideed ku caawin kartaa dhibanayaal xad-gudub?

Hellida xad gudubyada ku saabsan gudaha qoyskaaga ama saaxibaddaada waxay noqonaysaa mid aad kuugu adag inaad wax ka qabato Ku boorri dhibanaha inuu sameeyo wax uu kula tacaalikaro xadgudubka. Laakiin wax uuna dhibanuhu kaa ogolaanin ha samaynin. Taageer dhibanaha oo u kaxee tallaabada xigta

Haku cadaadinin dhibanaha inuu wax sameeyo Ha qorshaynin ama ha samaynin wax uuna dhibanuhu doonaynin.

Dhibanaha waxaad siisaysaa adareeska iyo telefoon lambarka xarumaha talo bixinta iyo qaxootiga dumarka

Midda ugu fiican ee lagu taageero dhibbane waa inaad la xidhiidho oo aad keentid xarunta talo bixinta.

Arrimo khuseeya qof kasta oo doonaya in la caawiyo

- Kaftanka ka saar Wax kasta oo dhibanuhu kuu sheegayo
- Dhagayso iyaga
- Waydii taageero noocee ah ayay doonayaan
- U sheeg waxaad malaynayso ama aad garwaaqsatay Laakiin tan same haddii aad tihiin adiga iyo dhiabnaha oo kaliya
- Noqo mid dabeecad wanaagsan, tusna inaad fahmayso
- Waa suurto gal in dhibanuhu uu diido caawimaaddaada Laakiin ku celceli taageeraddaada
- Iyagu ha go'aansadaan waxa ay doonayaan inay sameeyaan Xaqiiqdii waa muhiim inaad la joogto iyaga, aadna u fidiso taageeraddaada Ha gaadhin wax go'aan ah oo uuna ogolayn dhibanuhu, haddii xaataa go'aankaasi yahay midka ugu wanaagsan
- Dhibanayaashu masuul kama aha xad-gduubka, laakiin waxay dareemayaan inay yihiin dambiilayaal iyo kuwo qajilsan. Ka hadal arrinta
- Si kastaba Ha u khatar galinin dhibanaha
- Ha ula hadlin si xun
- Wakhti sii dhibanaha.

Dabeecadda dhibanuhu way adag tahay in la fahmo.

Tusaale ahaan:

- waa maxay sababta dhibanayaashu ayna u rabin inay ka hadlaan xadgudubkii ku dhacay oo ay u doonayaan inay iska laabaan.
- waa maxay sababta ayna u rabin inay ugu gudbiyaan booliiska.
- waa maxay sababta ay uga tagi la' yihiin sharci darrada
- waa maxay sababta ay u rabaan inay illoobaan ama dafiraan ficilka xad gudubka.

Haddii aad maqashid ficil xadgudub oo ka socda jaarkaaga,

wac booliiska Booliiska ayaa awood u leh inuu soo fara galiyo oo wax ka qabto.

Haddii carruuri ku sugan yihiin xad gudub,

wac booliiska – lambarka deg degga ah 133 – ama xarunta daryeelka carruurta iyo dhalinyarada – telefoon: +43 512 508 2642. Waa inaadan sheegin magacaaga.

Noocyada xad gudubyada

Marka laga fikirayo xadgudub, dadka badankoodu waxay u qaadanayaan xadgudub gacan qaad ah. Laakiin waxaa jira noocyo kale oo badan oo xadgudubyo ah. Waxaan kaa caawin karnaa inaad wax ka qabatid dhammaan xadgudubyada Halkan hoose ayaad ka helaysaa liis iyo sharraxaad noocyo badan oo xadgudub ah:

Xadgudubka gacan qaadka

Waa in qof kale ku soo weeraro. Tusaale ahaan:

- riixidda, Feedhitaanka, iyo ceejinta
- Dhirbaaxidda, ku dhufashada ama alaab ku tuuridda
- timo rifidda, xangaruufashada haynta wadatada, wax ku dhufashada
- sigaar ku gubidda
- qofka oo madaxa darbi loogu garaaco
- la isku dayay in la marjiyo ama la dilo

Ceebaynta

waa wear qof kale oo ujeeddadiisu tahay inuu ku waxyeeleeyo dadnimada qofka kale. Tusaale ahaan:

- Caayitaanka ama quudhsiga – Been ka faafinta Tan macnaheedu waxay tahay qof ayaa been ka sheegayaga qof kale isagoo ujeedkiisu yahay inuu waxyeelleeyo qofkaas.
- si u kas ah oo la iska jeediyo ama lala hadli waayo qof
- markasta oo qofka la yaso
- masayrka iyo in la kaantaroolo qoyska, saaxiibadda iyo dhallinta
- ku qaylinta qof si soo noq noqosho ah

Xad gudubyada bulshada

waxay dhibanayaasha ka kaxaysaa deegaankooda iyo dadka ay isu dhaw dhaw yihiin. Tusaale ahaan:

- waxaa dhaawacmaya ama dhimanaya xidhiidhkoodii qaraabada
- waxaa dhaawacmaya ama dhimana xidhiidhkoodii saaxiibadda

Xad gudubka galmada

ficil wasmo/galmo oo liddi ku ah rabitaanka dhibanaha. Tusaale ahaan:

- Kufsi ama isku day kufsi
- wasmo/galmo ceebayn – Tan macnaheedu waa ficilka wasmadu wuxuu ku dhacay rabitaan la'aanta dhibanaha
- wasmo xarraasid – Tani macnaheedu waa in qof mar walba odhanayo waxaan doonayaa inaynu is wasno adiguna aadan doonaynin
- hanjabaada wasmo – Tan macnaheedu waxay tahay inuu qof kuula dhaqmo inuu ku kufsado.

Xadgudubka dhaqaale

waxay dhibanaha ka dhigtaa mid lacag ahaan ugu tiirsan qof kale. Tusaale ahaan:

- u diiddida inuu lacag helo
- in lacag lagu siiyo samaynta waxa qofka kale doonayo

Xaraasidda iyo indho ku gubista.

Waa nooc kamid ah xadgudubyada Indho ku gubista macnaheedu waa in qof uu si kula talogal ah oo cel celin ah u daba socdo qof kale, oo uu doonayo inuu xarraaso qofkaas Xadgudubkan waxaa badanaa sameeya dadka horey heshiis u ahaan jiray marka ayna doonaynin inay ogoladaan in wadaaggii la iska daayo. Tusaale ahaan:

- iimaylo, waraaqo, farriin qoraal, iyo telefoon wicid wada xad dhaaf ah oo aan la doonaynin
- amaro aan la rabin oo magaca dhibanaha ah
- aad loo daba galay oo waliba la tijaabiyay

Xuquuqaha dhibanaha

Sharciga xakamaynta xadgudub ayaa ah inuu u fidiyo qof kasta ka xakamaynta xadgudub Waana in waliba la xakameeyo dadka iyagu horay u ahaa dhibanayaasha oo la tag daran xadgudubyo Isku soo duuboo dhibanayaashu waxay leeyihiin xuquuqo waafi ah, la liis gareeyay oo waliba halkan lagu sharaxay:

Amar bixinta maxkamadda iyo amar bixinta gooni yeelidda

Marka aad u soo gudbiso ficil xad gudub booliiska uuna booliisku aqbalo caafimaadkaaga, xorriyadaada ama xaataa in noloshaadu khatar ku jirto, kadib waxay eedaysanaha ku khasbayaan inuu ka guuro guriga ama falaatka Tan waxaa loo yaqaanaa amar bixin maxkamadeed oo uu booliisku ku sameeyay eedaysanaha Booliisku wuxuu kaloo ka mamnuucikaraa eedaysanaha soo galidda guriga ama falaatka Tan waxaa loo yaqaan amar bixin gooni eyelid ah Booliisku isla markiiba wuxuu furaha albaabka ka qaadayaa eedaysanaha

Haddii ciyaal ka yar 14 ay khatar ku sugan yihiin, booliisku wuxuu ka mamnuuci karaa eedaysanaha soo galidda dugsiga, adeegga daryeelka ilmaha, ama xarunta daryeelka dugsiga kadib.

Sii wadida xakamaynta maxkamadda

Haddii aad u baahan tahay xakamayn sii socota in lagaa xakameeyo eedaysanaha, waa inaad maxkamadda ka dalbataa muddo 2 todobaad ah oo booliisku soo faro galinayo. Halkaa waa inaad dalbataa "irbadda ku meel gaadhka ah". Irbadda ku meel gaadhka ah ee maxkamaddu macnaheedu waa Maxkamaddu waxay durbadiiba adiga kaa xakamaynaysaa eedaysanaha Eedeysanuhu ma soo gali doono aagaggaaga mudo dheer si kalena kuuma xarraasi karo. Dhibaato malahan cidda iska leh guriga ama falaatka. Haddii eedaysanuhu ku soo xadgudbo irbadda ku meel gaadhka ah waa in aad isla markiiba aad wacdid booliiska.